# Codsigaaga magangelyo

## Warbixinta dacwada Xaduudka

**Maxaa laguu siinayaa qoraalkan?**
Waxaad Nederlaan ka soo gashay xagga hawada- ama dekada badda. Hadda waxaad rabtaa inaad magangelyo weydiisato. Magangelyo waa: badbaado waddan kale ay siiso dadka aan wadankooda badbaado ku qabin iyo aan wadankooda badbaado ka heleynin.

Haddii aad magangelyo weydiisato, waxaad dowlada Nederlaan si rasmi ah u weydiisaneysaa sharci deganaansho. Sharcigan waxaad ugu baahan tahay inaad ku noolaato Nederlaan. Ka dib marka aad magangelyo weydiisato: waa dacwad sharci ahaan oo ay dowlada Nederlaan ku go'aamineyso inaad sharci degananasho heleyso iyo in kale. Codsigaaga magangelyo waxaa looga howl galaayaa gudaha dacwada xaduudka.  Dacwadani waxey IND muddo 28 beri uga go'aamineysaa codsigaaga.

Waxaa qoraalkan ku qoran waxa la sameynaayo mudada dacwada xaduudka kuu socdo. Waxaad kaloo ka aqrineysaa waxa lagaa rabo (waajibaadyada) iyo waxa aad ka filan karto dowalada Nederlaan (xaquuqdaada).

## Goormaa heleysaa sharci deganaansho magangelyo?

Waxaa sharciga ajaanibta ku qoran yahay sharuudahee aad ku heli kartaa sharci deganaansho oo magangelyodoon. Waxaad sharci deganaansho heleysaa haddii aad mid ka mid ah faahfaahinta soo socda ay ku quseyso:

- Waxaad heysataa sababo qayaxan oo aad wadanka aad ka soo jeedo uga cabsaneyso in laguu raadsanaayo xagga qabiilkaaga, diintaada, jinsiyadaada, fikrada siyaasada aad aaminsan tahay ama aad ka tirsan tahay koox gaar ah oo bushada.
- Waxaad heysataa sababo qayaxan oo aad uga cabsaneyso ciqaab dil ah, dil, jirdil ama dhibaateyn kale oo bani'aadannimo ahayn ama xaqiraad laguugu geysanaayo wadanka aad ka soo jeedo.
- Waxaad heysataa sababo qayaxan oo aad uga cabsaneyso ciqaab dil ah, dil, jirdil ama dhibaateyn kale oo bani'aadannimo ahayn ama xaqiraad laguugu geysanaayo wadanka aad ka soo jeedo.
- Xaaskaaga/ninkaaga, lamaanahaaga, aabahaaga, hooyadaada ama ilmo da'yar ayaa mar dhow sharci deganaansho magangelyo ka helay Nederlaan. Waxaa ka soo baxeysaa sharuudaha sharciga deganaanshaha magangelyada sharciga ku xiran sharciga qofka kale heysto.

## Maxaa adiga lagaa doonayaa?

Waxaa muhiim ah inaad mudada dacwada aad si waadix ah u sharaxdaa sababta aad magangelyo uga baahan tahay Nederlaan. Waxaa kaloo lagaa rabaa inaad dhamaan cadeymo kuwo aad heysato ama aad heli karto (sid dokumentiyada ama tusaale waraaqo arrintaada caawinaaya) aad tusto IND.

Ma jiraa wax xaaladaada shaqsi ahaan ku saabsan oo IND loo baahan yahay iney ku xisaabtamaan? Markaa taa waa gudbin kartaa. Markaa IND tallaabooyin ayey qaadi karaan, tusaale ahaan mudada wadahadalka (wareysiga) ama xerada xiran. Waxaa IND isku deyeysaa iney sida ugu wanaagsan iney kaaga taageeraan.

# Ururadee ayaa la kulmeysaa?

Koninklijke Marechaussee

Waxaa **Boliiska Xaduudka** (KMar) ilaaliyaan xaduudka Nederlaan. Iyo waxeykaloo baaraan dokumentiyada (tusaale baasaboorada)iney sax yihiin. Shaqaalaha waxey kaloo ku diiwaangelin karaan warbixintaada nidaamka.

VluchtelingenWerk Nederland

**VluchtelingenWerk Nederland** (VWN) waa urur madaxbanaan oo xaquuq insaanka u dooda oo waxaa loo sameeyey iney danaha magangelyodoonka. VWN waxey bixisaa warbixin iyo faahfaahin dacwada magangelyada, wargelisaa iyo taageertaa shaqsi ahaan marka lagu jiro dacwadan iyo wey dhexdhexaadisaa marka ay dhibaato ka jiraan ururo kale. Iyo waxey si aad ah ula shaqeeyaan garyaqaankaaga. VWN kama go'aaminayaan codsigaaga magangelyada.
www.vluchtelingenwerk.nl
www.refugeehelp.nl

Raad voor Rechtsbijstand

Waxaa De **Raad voor Rechtsbijstand** (RvR) kuu sameynayaan inaad caawino ka hesho garyaqaan haddii aadan adiga iska bixin karin. Markaa RvR ayaa bixinaaya qarashka garyaqaankaaga caawinaada uu ku siinaayo. Garyaqaanka uma shaqeeyo RvR.
Garyaqaanka waa caawiyaha aarimaha sharciyada oo madax banaan kaana caawinaaya dacwada magangelyada.
www.rvr.org

Immigratie- en Naturalisatiedienst
Ministerie van Justitie en Veiligheid

**Adeega Imigreyshaka- iyo Jinsiyada** (IND)Waa qeyb ka tirsan Wasaarada Cadaalada iyo Amaanka ee Nederlaan. IND waxey baaraan haddii aad xaq u leedahay magangelyo Nederlaan ka hesho. Sidaa awgeed ayaa wadahadalada ula leedahay shaqaalaha su'aalo ku saabsan qofka aad tahay. Iyo sababta aad Nederlaan magangelyo uga weydiisatay. IND ayaa baareysa arrintaada shaqsiga iyo xaalada wadanka aad ka timid. Ka dib ayaa IND go'aamineysaa inaad (muddo) Nederlaan joogi karto iyo in kale.
www.ind.nl

Argonaut

Waxaad xerada dejinta ballan la leedahay kalkaalisada **Argonaut Advies** (hore loo yaqaanay Medifirst). Kalkaalisadan waxey ku weydineysaa haddii aad la shaqeyneyso baaritaanka caafimaadka. Baaritaankan waxaa loogu talo galay in la sugo haddii aad dhibaatooyin maskax ahaan iyo/ ama jir ahaan leedahay kuwaasoo saameyn ku yeelan kara wadahadalada IND.

Dienst Terugkeer en Vertrek
Ministerie van Justitie en Veiligheid

**Waaxda dib u noqoshada iyo Bixitaanka** (DT&V)waaqeyb ka tirsan Wasaarada Cadaalada iyo Amaanka iyo waxey ma'uul ka yihiin fulinta maamulka dib u noqoshada ee Nederlaan. Haddii codsigaaga magangelyada ay soo diido IND, waxaa DT&V kula yeelanaysaa wadahadal ku saabsan dib u noqoshada wadanka aad ka soo jeeda.
www.dienstterugkeerenvertrek.nl

**Ururka Caalamiga ee Muhaajiriinta** (IOM) waa urur madaxbanaan oo dunida oo dhan dadka muhaajiriinta ayey caawiyaan. IOM waxey kaa caawini karaan marka aad si isku filnaan aad Nederlaan rabto inaad uga baxdo. IOM waxey ku siinayaan warbixin ku saabsan dib u noqoshada iyo la qabsashada iyo hagista iyo abaabulka ka bixida Nederlaan. Waxaad si toos ah ula xariiri kartaa IOM, DT&V, VWN ama garyaqaanka si ay kuu caawiyaan.
www.iom-nederland.nl

**Dienst Justitiële Inrichtingen** (DJI) waa qeyb ka tirsan Wasaarada Cadaalada iyo Amaanka ee Nederlaan. Waxaad joogeysaa meel xiran oo xaduudka ah maadaama Nederlaan inaad soo gasho laguu diiday. Dhismaha waa xero la ilaaliyo. Waxaa maamula dhismahan DJI. Shaqaalaha-DJI waxey xiran yihiin dirays. Iyaga ayaa ku daryeelaaya iyo ku hagaaya mudada aad joogto xaduudka la seexdo.
www.dji.nl

## Tallaabada 1: isdhiibitaanka, aqoonsiga iyo diiwaangelinta

Waxaad iska sheegeysaa ilaaliyaha xaduudka ee Nederlaan. Badiyaa waa Ciidanka xaduudka (Kmar). Shaqaalaha Kmar waxey xadidaayaan qofka aad tahay (aqoonsi). Iyo waxey warbixintaada shaqsiga gelinayaan nidaam wadani oo kambiyuutarka ah sida magacaaga, taariikhda aad dhalatay iyo jinsiyadaada (diiwaangelin). Waxey kaloo gelinayaan codsigaaga magangelyo.
Waxey Kmar baarayaan dharkaaga iyo alaabtaada iyo waxey kaa qaadayaan sawir iyo astaanta farahaaga. Waxaa lagu siiyey qoraal oo sharaxaad ku qoran yahay sababta faraha lagaaga qaadaayo. Xagga Kmar waad saxiixeysaa codsigaaga magangelyo.
Kmar waxey kaloo su'aalo kaa weydiin karaan:

- safarkaaga;
- haddii aad hore magangelyo u weydiisatay halkan ama meel kale oo Yurub ah; iyo
- haddii ay dad familkaaga ay joogaan halkan ama meel kale oo Yurub ah.

Dowlada Nederlaan marna uma gudbinayaan dowlada wadankaaga aad ka soo jeedo inaad Nederlaan magangelyo ka weydiisatay.

### Xerada xiran

Dhowr saacadood gudahooda marka aad is dhiibto, aqoonsiga iyo diiwaangelinta ka dib, waxaa lagu geynaayaaxero xiran oo u dhow garoonka diyaarada Schiphol. Waxaa xaruntan layiraahdaa Xarunta Cadaalada Schiphol (JCS). Xerada JCS wey xiran tahay, maadaama (weli)aadan fasax laguu siinin inaad Nederlaan aad gasho. Waxaa halkan joogeysaa dhamaan ilaa mudada dacwada socoto. Adiga iskaaga meeshan ugama bixi kartid. Waxaa JCS dhexdeeda ku yaalaa xafiiska IND.

## Tallaabada 2: warbixinta VWN iyo isbarashada garyaqaanka

Waxaa warbixinka heleysaa VWN oo dacwada magangelyodoonka ku saabsan. Shaqaalaha VWN ayaa warbixin ku siinaaya iyo ku taageereysa mudada dacwada maganglyodoonka. Shaqada VWN waa lacag la'aan. VWN si taxadar leh ayey warbixintaada u haynayaan.

Ilaa hal beri ka dib ayaa waxaad wadahadal isbarasho ah la leedahay garyaqaankaaga. Garyaqaanka marka aad codsiga magangelo sameyso ayaa lagugu xiraayaa. Garyaqaankan uma shaqeeyo dowlada Nederlaan. Looma baahna inaad garyaqaanka adiga bixiso.

## Tallaabada 3: wareysiga isdhiibitaanka

- Wadahadalka koowaad aad la yeelato IND, waxaa lagu magacaabaa wareysiga is dhiibida. Waxaa suura gal ah in xaaladaada xadideyso inaad wareysi isdhiibida lagula yeelan. Waxaa wareysiga isdhiibida ay IND ku weydiineysaa su'aalo si ay warbixin uga helaan mawduucyada soo socda: qofka aad tahay;
- meesha aad ka timid;
- sida aad u soo safartay;
- dokumentiyada aad heysato;
- haddii wadan kale oo Yurub ah loo baahan yahay inuu ka go'aamiyo codsigaaga magangelyo (dacwada Dublin).

Mudada wareysiga isdhiibida waxaa su'aalo lagaa weydiinayaa:
- shaqsiyadaada, jinsiyadaada, asalkaaga, degaankaaga iyo agagaarka degaankaaga;
- familkaaga;
- dokumentiyada;
- waxbarashada;
- shaqada iyo waajibka milatariga;
- deganaan wadamo kale;
- safarkaaga ilaa Nederlaan; iyo
- sababta aad magangelyada u weydiisaneyso.

Waxaa jawaab gaaban ka bixineysaa su'aasha sababta aad magangelyada u weydiisaneyso. Waxaa IND u isticmaaleysaa warbixintan si uu dacwada magangelyada si fiican oo dhaqso ah u socdo. Mdada wareysiga dambe ayaa fursad buuxda lagu siinayaa aad ku sheegato sababta aad codsiga magangelyada u weydiisato.

IND waxey ka sameynayaan qoraal wareysiga. Adiga waxaad koobi ka heleysaa IND ama xagga garyaqaankaaga.

Mar walba sheego warbixintaada saxda ah ee ha sheeganin waxa ku qoran dokumentiga (safarka) ee been abuur ah. Una sheeg haddii aad magac kale (=magac kaaga ahayn) aad soo istcmaashay. Ma siiisay warbixin qalad ah ama faahfaahin been abuur ah IND? Markaa taasi saameyn ayey ku yeelaneysaa go'aaminta dacwadaada magangelyo.

**Dokumentiyada**
Dokumentiyada aad ayey muhiim ugu yihiin go'aaminta codsigaaga magangelyo. Ma heysataa dokumenti shaqsiyadaada cadeyn kara, sida baasaboor, aqoonsi, warqad dhalasho ama laysan baabuur? Ama ma heysaa dokumentiyo jidka safarkaaga ama dhibaatadaada magangelyo caawinaaya, sida tigidka diyaarada, warqada diyaarada lagu galo, shahaadooyin, xukunka ama maqaalada wargeyska? Dokumentiyadan sida ugu dhaqsaha badan u dhiibo marka diiwaangelinta KMar ama marka wareysiga hore ee IND. Waxaad kaloo markaa ka dib, tusaale ahaan mudada wareysiga dambe, dokumentiyada weli waa dhiiban kartaa. Shaqaalaha Ururka qaxootiga caawiya VWN ee jooga xerada xiran ayaa kaa caawin kara taasi. Dokumentiyadaada qabiiriin ayaa soo baaraaya iney sax yihiin. IND waxey isticmaaleysaa dokumentiyadan marka ay ka go'aaminayaan codsigaaga magangelyada.

Warbixinta shaqsiyadaada dokumentiyada aad ayey muhiim ugu yihiin go'aaminta codsigaaga magangelyo. Noqo mid dhameystiran iyo fiiri in warbixinta si sax ah loo qoray. Marna ha tuurin dokumentiyada shaqsiga.

**Tarjumaan**
Wadahadalada IND la leedahay waxaa jooga tarjumaan. Waxaa IND su'aalaha kugu weydiineysaa luqada Nederlaanka. Tarjumaanka ayaa ku tarjumaaya luqada adiga aad fahmeyso. Tarjumaanka ayaa jawaabtaada u tarjumaaya luqada Nederlaanka. Tarjumaanka uma shaqeeyo IND oo wax awood ah kuma laha go'aanka codsigaaga magangelyada. Isla markii sheeg haddii aad adiga iyo tarjumaanka aad si fiican isu fahmeynin. Markaa IND tarjumaan kale ayey kuu abaabulaayaan. Waa muhiim inaan wax is afgaran waa aysan abuurmin adigoo su'aasha si fiican u fahmin darteeda.

## Tallaabada 4: mudada nasashada iyo is diyaarinta

Wareysiga hore ka dib waxaad leedahay 6 beri oo nasasho iyo isdiyaarinta ah (RVT). Mudada RVT waad nasan kartaa iyo waxaad isku sii diyaarin kartaa dacwada magangelyada. VWN ayaa kaa caawinaaya aruurinta cadeymaha iyo dokumentiyada. Iyadoo lala tashanaayo garyaqaankaaga ayaa IND weydiin kartaa in RVT la soo gaabiyo.

IND ayaa xadideyso inaadan RVT heleynin. Taasi waa tusaale ahaan haddii aad wadan amaan ah aad ka soo jeedo. Taasi sidoo kale waa la mid haddii aad sharci deganaansho magangelyo heysato waddan kale oo Yurub-ka tirsan, Noorwey, Ijsland Liechtenstein ama Swiiska.

**Talada caafimaad**
Ma xadidey IND inaad dacwada xaduudka aad ku mareyso wareysi aad ku sheegan karto sababa aad magangelyo u weydiisaneyso? Waxaa iyadoo baaritaan gaaban la sameynaayo kalkaaliso dhowr su'aalo ku weydiineysaa. Kalkaalisada waxey qoreysaa talo caafimaad. Haddii loo baahdo, waxaa kalkaalisada kuu direysaa dhaqtar oo baaritaan dheeraad sameeyo. Maka soo baxeen arrimo fiiro gaar u baahan

baaritaanka oo muhiim u noqon kara wareysiga ama go'aanka IND? Markaa waxey kalkaalisada ama dhaqtarka ay u gudbinayaan IND. Waxaa IND ku xisaabtameysaa mudada dacwada magangelyada warbixintan ku saabsan xalada caafimaadkaaga.

Waa muhiim inaad daacad tahay arrimaha jira ee dhibaatooyin xagga maskax ahaan ama jir ahaan. Kala hadaldhibaatooyinkaan kalkaalisada ama dhaqtarka.
Qoraalka baaritaanka caafimaadka waa kalsooni. Baaritaanka caafimaadka ma aha mid qasab ah. Baaritaanka caafimaadka wax qaras ah ma bixineysid.

Haddii aadan rabin inaad la shaqeyso baaritaanka caafimaadka, waxaad u sheegi kartaa kalkaalisada.  Markaa IND mudada dacwadaada magangelyada si fiican ugama xisaabtami karaan xaaladaada caafimaadka.

**Baaritaanka- qaaxada**
Qaaxada waa cudur daran oo dunida meelo badan ka jira. Laga yaabo wadanka aad ka timid. Dadka qaba qaaxada furan dad kale ayeyqaadsiin karaan, tusaale iyagoo qufacaaya ama hindhisaaya.

Shaqaalaha Adeega Caafimaadka ee xerada xiran ayaa arrintan dhowr su'aalo kaa weydiinaaya. Tani waxey caadi ahaan la sameeyaa mudada RVT. Laakiin waxaa kaloo suura gal ah in taasi la sameeyo RVT ka hor. Haddii ay jirto shaki ah in aad qabto qaaxo, waxaa mareysaa baaritaan-qaaxo buuxda. Sidaa darteed waxaa lagu geynaayaa cisbitaalka. Haddii aad qabto qaaxo, waxaa Nederlaan heleysaa daawo. Dacwada magangelyada waxaa hadey xaalada sidaa tahay la bilaabayaa daryeelka caafimaadka ka dib.

**Caawinaada garyaqaanka**
Wadahalka aad garyaqaanka la leedahay ayuu kuugu diyaarinaayaa wareysiga IND ee ku saabsan sababaha aad magangelyada u weydiisaneyso. Wadahadalkan diyaargaroobida ee la leedahay garyaqaanka waxaa lagu sameynayaa dhismaha aad joogto. Garyaqaankaaga si taxadar leh ayuu warbixintaada u haynayaa.

## Tallaabada 5: dacwada magangelyodoonka maalin ilaa maalin

RVT ka dib waxaa bilaabanaaya Dacwada Guud Magangelyodoonka (AA). Waxaa AA uu soconaaayaa 6 beri iyo waxaa lagu qabanaayaa dhismaha aad joogto. Waxaa kaloo jira AA ka dheer: waa AA+ kaasoo badiyaa socda 9 beri. Waxaa AA+ waxaa loogu talo galay codsiyada magangelyada ee IND u maleyneyso inuu wareysiga dambe uu dheer yahay ama baaritaan dheeraad loo baahan yahay. Iyo magangelyodoonka u baahan fiiro dheeraad xagga maskax ahaan ama dhibaato jir ahaan qaba. Hoos ayaa ka aqrineysaa sida uu dacwadaada magangelyada maalin ilaa maalin sida uu u soconaayo.

*Dacwada Guud ee magangalyodoonka (AA)*

**Maalinta 1: wareysiga dambe**
Wareysiga dhibkaaga waxaa kula yeelanaaya shaqaale ka socda IND. Wareysigan waxaad si faahfaahsan u sheeganeysaa sababaha aad magangelyada u weydiisaneyso. Waxaa iND ay mudada wareysiga ku weydiinayaan su'aalo. Sidoo kale wareysigan waxaa jooga tarjumaan. Haddii aad rabto, VWN ayaa weydiin karta iney kula joogaan marka aad leedahay wareysiga dambe.

Ma weydiisateen adiga iyo lamaanahaaga(guurka isku qabtaan) codsi magangelyo? Markaa labadiina si kala gaar ah ayaa shaqaale IND idiin wareysanayaa. Hadii aad caruur heysato oo jira 15 ama ka weyn? Markaa waxey iyagana marayaan wareysi u gaar ah.

Waxaa muhiim ah inaad sheegto wax walba oo cadeynaayo inaad magangelyo u baahan tahay. U sheeg si daacad ah, buuxda iyo waadix ah waxa kugu dhacay. Iyo sababaha aad badbaado uga heleynin wadanka aad ka soo jeedo. Haddii aad dhacdo gaar ah sida ay ahayd aadan u xasuusanin, sidaa ugu sheeg IND.
Shaqaalaha-IND wey la socdaan xaalada guud ee wadankaaga. Waxaa muhiim ah inaad u sheegto adiga xaaladaada: maxaad adiga ugu baahan tahay badbaado shaqsiyadaada ah? U sheeg inta ugu badan ee faahfaahibta muhiimka ah. Ma leedahay calaamado, xanuuno jirka ama maskaxda ah oo ku saabsan sababta aad magangelyada u weydiisaneyso? Markaa waa muhiim inaad taasi IND u sheegtaa. Waxaa IND ka go'aamin kartaa iney kuu diraan baaritaan caafimaad haddii ay IND muhiim u tahay go'aanka codsigaaga. Adigana baaritaankan iskaaga waad u sameyn kartaa qarashka adiga iskaaga u bixinaaya.

**Maalinta 2: aqriska wareysiga dambe**
Garyaqaankaaga ayaa kuu aqrinaaya qoraalka wareysiga dambe. Sidoo kale wadahadalkana waxaa jooga tarjumaan wada tarjumaaya dhamaan wixii adiga iyo garyaqaanka ka wada hadleysiin. Haddii qoraalka wax ka dhiman yihiin ama aan si sax ah loo qorin, markaa garyaqaanka ayaa warqad u diraayo IND.

**Maalinta 3: go'aanka koowaad**
Waxay IND go'aamineysaa inaad ka soo baxeysid sharuudaha sharciga deganaanshaha magangelyada. Natiijada go'aankan ayaa xadidaaya sida ay dacwadaada magangelyo u socon doonto. Waxaa jira 3 arrin oo suura gal ah:
1. Waxaa ka soo baxeysaa sharuudaha sharciga deganaanshaha magangelyada. Waxaa heleysaa (garyaqaankaaga xagiisa) warqada IND kaasoo ku qoran in dacwada xaduudka uu dhamaaday iyo inaad geli karto Nederlaan. Codsigaaga magangelyo iyadoo lagala tashanaayo garyaqaankaaga sida ugu dhaqsaha badan ayaa looga go'aamin doonaa. Waxaad laguu oggol yahay inaad (muddo) Nederlaan ku noolaato. Garyaqaankaaga ayaa kuu sharaxaaya sida ay tani kuu saameyneyso.
2. Iney IND muddo dheeraad oo baaritaan ku sameeyaan oo ma suuroobeyso in 28 beri gudahooda uga go'aamiyaan. IND waxey codsigaaga magangelyada uga shaqeyneysaa Codsiga Magangelyada la Dheereeyey (VA). Dacwadan waxaa ay ka dhaceysaa xerada dejinta(furan). Go'aanka codsigaaga magangelyada ka dib ayaa la gaarayaa. Waxaa lagu siinayaa qoraal kale oo warbixin ah oo ku saabsan VA.
3. Waxaa IND go'aamineysaa inaadan ka soo baxeynin sharuudaha sharciga deganaanshaha magangelyada. Waxaa heleysaa (garyaqaankaaga xagiisa) warqada IND kaasoo ku qoran iney damacsan yihiin iney codsigaaga magangelyo soo diidaan. Qoraalkan waxaa loo yaqaan waxa la damacsan yahay. Warqadan waxaa kaloo ku qoran sababaha diidmadan iyo wixii saameyn ay taasi kugu yeelaneyso. Garyaqaankaaga ayaa warqadan kaala hadlaaya.

**Maalinta 4: jawaabta go'aanka: waxa loogu jawaabay**
Waxaa IND damacsan tahay iney codsigaaga magangalyodoonka ay soo diidaan markaa waxaa taasi kala hadleysaa garyaqaankaaga. Garyaqaankaaga ayaa IND ka dib u diraaya qoraalka jawaabta. Tani waa warqad oo aad si rasmi ah ugaga jawaabeyso waxa ay damacsan yihiin IND. Warqadan ayaa ku sheegi kartaa sababta aad ugu raacsanayn waxa ay damacsan yihiin.

**Maalinta 5 iyo 6: go'aanka**
Marka la aqriyo warqada jawaabta waxaa IND go'aamineysaa in waxa la damacsan yahay wax laga bedalaayo. Waxa ka soo baxa go'aankan ayaa xadidaaya sida uu dacwadaada magangelyada u soconaayo. Waxaa heleysaa (garyaqaankaaga xagiisa) warqad ka socda IND ku qoran natiijada go'aanka. Garyaqaankaaga ayaa kuu sharaxaaya sida ay tani kuu saameyneyso. Waxaa jira 3 arrin oo suura gal ah:

1. Waxaa ka soo baxeysaa sharuudaha sharciga deganaanshaha magangelyada. Waxaa heleysaa (garyaqaankaaga xagiisa) warqada IND kaasoo ku qoran in dacwada xaduudka uu dhamaaday iyo inaad geli karto Nederlaan. Codsigaaga magangelyo iyadoo lagala tashanaayo garyaqaankaaga sida ugu dhaqsaha badan ayaa loo ogolaan doonaa. Waxaad laguu oggol yahay inaad (muddo) Nederlaan ku noolaato. Garyaqaankaaga ayaa kuu sharaxaaya sida ay tani kuu saameyneyso.
2. Iney IND muddo dheeraad u baahan tahay oo baaritaan ku sameeyaan oo ma suuroobeyso in 28 beri gudahooda uga go'aamiyaan. IND waxey codsigaaga magangelyada uga shaqeyneysaa VA. Dacwadan waxaa ay ka dhaceysaa xerada dejinta(furan). Go'aanka codsigaaga magangelyada ka dib ayaa la gaarayaa. Waxaa lagu siinayaa qoraal kale oo warbixin ah oo ku saabsan VA.
3. Waxay IND waxey weli la tahay inaadan ka soo baxeynin sharuudaha sharciga deganaanshaha magangelyada. Waxaad heleysaa (garyaqaanka xagiisa) warqada IND (= go'aanka) oo ku qoran in IND codsigaaga magangelyo ay soo diiday iyo aad adiga ay tahay inaad wadankaaga aad ka soo jeedo ku noqoto. Waxaa kaloo ku qoran sababaha ay sidan u tahay iyo waxa saameyn ay leedahay. Iyo waxaa kaloo ku qoran waxa aad sameyn karto haddii aadan ku raacsanayn diidmada. Waxaa kaloo ku qoran warqada wixii suura gal ah si aad ugu noqoto wadanka aad ka soo jeedo. Garyaqaankaaga ayaa kaala hadlaaya go'aankan.

Dacwada guud ee qaxootinimada 9 beri (AA+)

IND dacwadaada magangelyada ma uga shaqeyneysaa habka AA+? Markaa wuxuu dacwadaada magangelyada badiyaa soconayaa 9 beri:

- Maalinta 1 iyo 2: wareysiga dambe;
- Maalinta 3 iyo 4: aqriska wareysiga dambe ee garyaqaanka;
- Maalinta 5: go'aanka koowaad;
- Maalinta 6 iyo 7: jawaabta go'aanka waxa garyaqaanka jawaab uu qoray;
- Maalinta 8 iyo 9: go'aanka labaad.

**Dacwada xaduudka ugu badnaan 28 beri**
Halkan kore waxaa lagu sharaxay in AA 6 beri iyo AA+ 9 beri uu soconaayo. Waxaa IND ay dacwada xaduudka xaaladaha qaarkood go'aamin karaan in la dheereeyey ugu badnaan 28 beri. Dacwada xaduudka sabtida, axad iyo maalmaha ciidaha waa maalmo shaqo.

Waxaa IND isku deyeysaa in dacwada xaduudka sida ugu gaaban ee suurta gal ah looga dhigo, si aad micno daro aadan ugu jirin xero xiran. Isla markii ay waadix

noqoto inaan codsigaaga magangelyo aan dacwada xaduudka loogu hawlgeleynin, wuu joogsanayaa dacwadan. Codsigaaga markaa ka dib, sida aad hore u soo aqrisay, looga sii hawl geli doonaa xagga AA banaanka dacwada xaduudka ama xagga VA. Markaa waxaad labada xaaladoodba aad joogeysaa xero furan oo Xarunta Dejinta Magangelyodoonka (COA).

*Dacwada magangelyodoonka la fududeeyey*

Ma ka soo jeedaa wadan amaan ah? Ama aad tahay muwaadin Yurubta midoobay ama Aaga Dhaqaalaha Yurub? Markaa rajada wey weyn tahay inaadan magangelyo helin. Waxaa IND uga shaqeyneysaa codsigaaga qaab la fududeeyey iyo dacwada deg dega ah. Mudada dacwadan waxaa keliya IND kula yeelaneysaa hal wareysi. Taasi sidoo kale waa la mid haddii aad sharci deganaansho magangelyo heysato oo Nederlaan, waddan kale oo Yurub-ka tirsan, Noorwey, Ijsland Liechtenstein ama Swiiska.

Ka aqri warbixinta qoraalka ee dacwada magangelyada la fududeeyey.

*Liiska wadamada amaanka*
Albanië, Armenië, Bosnië-Herzegovina, Brazilië, Georgië, Ghana, India, Jamaica, Kosovo, Marokko, Mongolië, Montenegro, Noord-Macedonië, Senegal, Servië, Trinidad en Tobago, Tunesië, Verenigde Staten.

Liiskan wuu isbedeli karaa: wadamo ayaa ku darsami kara ama ka bixi kara. Waxey taasi ku xiran tahay amaanka wadanka. Liiska ugu dambeeya ee wadamada amaanka waxaa ay ku qoran tahay websaaytka Dowlada:www.rijksoverheid.nl

## Dib u ceshashada codigaaga

Waa kuu banaan tahay inaad codsigaaga mar walba oo aad jeceshahay ka soo noqoto. Hadey xaalada sidaa tahay waxaa fiican inaad la xariirto garyaqaanka ama IND. Ma ka soo noqoneysaa codsigaaga ee IND? Markaa Nederlaan ma sii joogi kartid. Ilaa haddii aad sabab kale laguugu ogol yahay inaad ku joogto. Waxaa kale lagu siin karaa mamnuucid safar soo gelitaanka. Sidaa awgeed laguuma oggola inaad ku safarto muddo Yurubta Midowday (EU), Noorway, Ijsland, Lichtenstein iyo Swiiska. Marka aad codsigaaga magangelyo kasoo noqoto ka dib dib magangelyo waad u weydiisan kartaa. Xitaa haddii lagu siiyey mamnuucud safar gelitaan.

## Dacwada magangalyodoonka ka dib

Ma soo diiday IND codsigaaga magangelyodoonka? Markaa waxaad kala hadleysaa garyaqaankaaga si aad uga dacwootaan go'aankan xagga xaakinka Nederlaan. Taasi waxey micnaheeda tahay in aad si rasmi ah xaakinka u ogeysiineysid inaadan ku raacsanayn go'aanka IND. Waxaad kaloo xaakinka weydiin kartaa inaad mudada dacwada socoto Nederlaan ku sii sugto. Garyaqaankaaga ayaa taasi kaa caawinaaya. Xaakinka wuxuu baarayaa ka dib in IND ku dhaqantay sharciga Nederlaan u degsan marka ay go'aanka gaarayeen ee codsigaaga magangelyo. Go'aanka xaakinka xaaladaha badankooda waa laguu oggol yahay inaad Nederlaan ku sugto. Waxaad joogeysaa xerada xiran ilaa xaakinka uu go'aan ka gaaraayo. Markaa badiyaa waxaa lagu siinayaa mamnuucid safar soo gelitaanka Yurub ah. Marka la soo diido ka dib magangelyo waad u weydiisan kartaa. Xitaa haddii lagu siiyey mamnuucud safar gelitaan.

**Dib u noqosho**
Adiga ayaa mas'uul ka ah ku noqoshada wadanka aad ka soo jeedo. Waaxda Dib u noqoshada iyo Bixitaanka (DT&V) ayaa kaa caawinaaya diyaarinta bixitaankaaga. Sidaa awgeed DT&V ayaa kula soo xariiraaya marka diidmada codsiga magangelyada ka dib. Haddii aad mudada laguu sheegay gudaheeda iskaaga u bixi weydo, waxay DT&V qaadayaan tallaabooyin si laguugu qasbo inaad Nederlaan ka baxdo. Waxaad joogeysaa xerada xiran ilaa mudada uu socdo nidaamka celinta.

Ma rabtaa ka hor inaa DT&V dib u noqosho kala hadasho? Markaa garyaqaankaaga ama VWN ayaa kula xariirinaaya DT&V. Adigana iskaaga waad la xariir kartaa DT&V adigoo u diraaya e-mailka ilc@dtv.minvenj.nl

Haddii aad si iqtiyaari ah ugu noqoneyso wadankaaga, waxaad la xariiri kartaa DT&V ama Ururka Caalamiga Internationale Organisatie voor Migratie (IOM). Websaaytkooda ayey ku qoran qaabka.
Waxaad kaloo ka aqrineysaa warbixinta dib u noqoshada iyo caawinaadee (qarashka asaasiga caawinaada iyo/ama caawinaada dib ula qabsashada)ee suura galka ah inaad heleyso. Iyaga ayaa warbixinta guud ku siinayaa iyo kaa caawineysaa bixitaankaaga. Waxaad kaloo weydiin kartaa wixii suáalo ku saabsan dib u noqoshada iyo caawinaada VWN.

## Keydinta xogta shaqsiga

Xogta shaqsiga waa dhamaan wixii warbixin ee adiga kugu saabsan. Ururada la shaqeeyey qoritaanka qoraalkan hoos ayey ku qoran yihiin. Ururadaan wey isticmaalaan xogta shaqsiga mudada codsigaaga laga shaqeynaayo, soo gudbinta ama codsiga. Waxey ku weydiinayaan warbixintaada iyo ururada kale ama dadka kale hadii loo baahdo. Ururadaan waxey isticmaalaan iyo keydiyaan warbixintaada iyo waxey u sii gudbiyaan ururo kale haddii taasi sharci ahaan qasab tahay. Sharciga xogta shaqsiga waxaa ku qoran waajibaad saaran ururada warbixinta isticmaala. Waa iney si sax ah iyo amaan ah warbixintaada u isticmaalaan. Sharciga xogta shaqsiga waxaa kaloo ku qoran xaquuqdaada. Haddii aad weydiisato, waxaad leedahay tusaale ahaan xaquuqda soo socda:
• inaad aragto warbixintaada ururada haaya;
• ogaato waxa ay ururada ku sameynayaan warbixintaada iyo sababta;
• ogaato ururadee warbixintaada loo gudbiyey.

Ma rabtaa inaad wax dheeraad ka ogaato isticmaalka xogtaada shaqsiga iyo xaquuqdaada? Markaa fiiri websaaytyada ururadaasi.

## Su'aalaha marar badan la weydiiyo

**Goormaa ayaan la leeyahay wareysiga koowaad ee IND?**
Marka aad is dhiibto waxaad wadahadalka koowaad la leedahay IND. Taasi waxa lagu magacaabaa wareysiga isdhiibitaanka. Ka dib waxaad heysataa mudada nasasho-iyo isu diyaarinta (RVT) waqti 6 beri ahoo aad nasato iyo aad isku diyaariso dacwada magangelyada. Ma rabtaa RVT gaaban? Markaa taasi waxaa kala hadli kartaa garyaqaankaaga iyo IND loo gudbiyo.

**Maxaa dhacaaya haddii IND ay 6, 9 ama 28 beri ku soo jawaabi karin dacwada xaduudka?**
Waxaa kaloo IND go'aamin kartaa iney codsigaaga magangelyada uga shaqeyneyso Magangelyada la Dheereeyey (VA). Waxaad markaa lagu siinaayaa qoraal kale oo warbixin dheeraad ku qoran ku saabsan VA. Waxaad adiga joogeysaa xero dejinta furan. Sharciga ayey ku qoran tahay meeqa bilood gudahooda IND ay go'aamiyaan laga bilaabo taariikhda codsigaaga magangelyodoonka. Tani waa waqti go'aamin sharciyeysan. Ka aqri mudada go'aaminta sharciyeysan www.ind.nl/beslistermijnen ama www.ind.nl/en/decision-periods. Mudada go'aaminta mar mar waa la dheereyn karaa. Laakiin IND lama oggola iney wax ka badan 21 bilood iney gaarsiiso go'aan gaarida.

IND ma kuu soo dirin go'aan 6 bilood ka dib marka aad codsiga magangelyo weydiisatay? Markaa waxaad IND qoraal ahaan u weydiin kartaa iney IND sida ugu dhaqsaha badan uga soo jawaabaan. Garyaqaankaaga ayaa taasi kaa caawin kara.

**Waxaan arrinteyda magangelyodoonka u sheegan karaa nin ama naag. Ma suuro galbaa?**
Haa, taasi waxaad ku sheegeysaa (=wareysiga koowaad ee IND). Waxaa IND isku deyeysaa in shaqaale nin ama naag ah iyo tarjumaan nin ama naag ah oo wareysiga dambe ah.

**Maxaa sameeyaa haddii aan jiranahay ama uur leeyahay?**
Haddii aad jiran tahay ama uur leedahay, u sheeg kalkaalisada Adeega Caafimaadka ee garoonka diyaarada. Iyo kalkaalisada mudada baaritaanka talada caafimaadka. Tani aad ayey muhiim u tahay haddii aad xanuun leys qaadsiiyo leedahay, ama aad u maleyso inaad qabto, sida: qaaxada ama tiibiiga, isnidaamis/cuncun ama cagaarshow B. Wax walba oo aad u sheegto kalkaalisada, waxaa loo xafidayaa kalsooni. Kalkaalisada warbxintaada caafimaadka marna uma gudbiyaan dad kale adigoon fasax lagaa qaadin.

Haddii aad mudada codsigaaga magangelyo xanuunsato, markaa u sheeg shaqaalaha IND ama VWN. Iyaga ayaa ku caawin kara si aad u hesho caawinaada (caafimaad). Ma jiran tahay maalinta aad wadahadalka la leedahay IND ama garyaqaankaaga? Weydii markaa sikuuritiga ama VWN iney taasi u gudbiyaan garyaqaankaaga ama IND.

**Ma qabtaa su'aalo ka dib markaad qoraalka aqrisey?**
Waxaad su'aalahan weydiin kartaa garyaqaankaaga ama IND ama VWN.

**Ma qabtaa ashtako?**
Dhamaan ururada ku shaqada leh dacwada magangelyada, waxey u shaqeeyaan si shaqaalenimo iyo sax ah. Ma kula tahay in si aan wanaagsaneyn kuula dhaqmay urur? Markaa ashtako ayaa gudbin kartaa. Garyaqaankaaga ayaa taasi kaa caawin kara.

Qoraalkan waxaa soo wada saaray:
Qeybta Boliiska Ajaanibta, Aqoonsiga iyo Ka ganacsiga Dadka (AVIM)
Nidos
Waaxda Hay'adaha Cadaalada (DJI)
Ururka dejinta Magangelyodoonka (COA)
Adeega Imigreeshanka iyo Jinsiyada (IND)
Ciidanka Ilaaliya xaduudka (KMar)
Guddiga taageerida Sharciyada (RvR)
Urur qaxootiga Caawiya Nederlaan (VWN)
Ururka Muhaajiriinta Caawiya (IOM)
Waaxda Dib u Noqoshada iyo Bixitaanka (DT&V)

Oo ay soo dalbeen:
Wasaaradda Cadaalada iyo Amaanka, maamulaha maamulka Imigrashanka
www.rijksoverheid.nl

Qoraalkan waxa ku qoran wax xaquuq ah kama soo saari kartid. Haddii tarjumaada ay dhaliso fahmid qalad ah, markaa mida Nederlaanka ayaa la raacayaa.